

# Boogaha Ka dhasha Fentanyl Leh Xylazine

## Waa maxay xylazine?

Xylazine (“tranq”) waa daawo xayawaanka lagu dejiyo ‘tranquilizer’ oo noqonaysa mid caam ah dhanka keenista daroogada sharci darrada ah ee dalka oo dhan. Waxaa lagu daraa daroogada kale ee waddooyinka, gaar ahaan fentanyl. Sida fentanyl, xylazine waxay keeni kartaa hurdeystaan ‘sedation’, miyirka oo la lumiyo, neefsashada oo yaraata, iyo in wax lagu tiirsanaado. In kasta oo ay naloxone aysan ku shaqeynin xylazine, naloxone waa in had iyo jeer la siiyaa dadka la tuhunsan yahay in ay qaateen daawo xad-dhaaf ah ‘overdose’—waxbay caawin doontaa haddii fentanyl ama opioid kasta oo kale qayb ka ahayd. Haddii aad u maleynayso in qof qaatay daawo xad-dhaaf ah, waxaad siisaa naloxone oo wac 911. Haddii uusan neefsanayn, bilaw neefsashada samatabixinta ilaa dadka jawaabta ka bixiyaha xaalada degdega ah ay ka imaanayaan.

Daroogada ka kooban xylazine waxay keeni karaan boogo ‘wounds’ si dhakhso u waynaan kara oo ay adag tahay in la daaweeyo.



Boogo ay keeneen daroogada ka kooban xylazine.

## Boogaha Xylazine

- Waxaa dhici karta in soo muuqato haddii aad isku durto, sigaar ahaan u cabto ama naqas ahaan u qaadato fentanyl oo lagu daray xylazine.
- Waxay ka bilaabmi karaan meel kasta oo ka mid ah jirkaaga, gaar ahaan gacmaha, lugaha, ama cagaha. Meelahani si joogto ah uga fiiri caalamadaha boogo cusub.
- Booguhu waxay noqon karaan kuwo hoos u qodan “tunnel” ama waxay ku faafi karaan nudayaasha u dhow. Waxay sameyn karaan qolof adag iyaga oo isku dayaya in ay bogsadaan.
- Way adag yihiin in la daryeelo marka loo eego noocyada kale ee boogaha.

## Sida loo daryeelo boogaha

- Boogaha ku nadiifi saabuun ama biyo ugu yaraan 2-3 maalmood.
- Boomaatada mari suufka ‘gauze’ oo dulsaar boogta oo dhan. Ku dabool suuf qalalan oo badan.
- Ku duub suuf qalalan oo nadiif ah oo ku xir faashad. Hubi in waxa aad ku duubto uusan aad ugu dheganayn.
- Ku dabool dhaymada faashada ACE, faashada coban, ama shaati gacmo dheere ah/surwaalo.
- Dhaymada beddel 1-3 maalmood ee kasta. U fiiro calaamadaha si aad u raadsato daryeel caafimaad.

## Marka la raadsado daryeel caafimaad


- Boogta oo bilawda in ay u muuqato mid aan caadi ahayn (mugdi ah, madow, guduudan, diiran, adag tahay in la taabto, qaro weyn, ur leh, ay ka soo baxayaan waxyaabo jaalle/cagaar ah).
- Haddii aad qabto calaamadaha infekshan:
  - » Qandho
  - » Maqaarka oo diiran, guduudan, xanuun badan ama bararsan meel u dhow boogta



- » Dhiig ama malax ka socota boogta
- » Ur xun oo ka imaanaysa boogta
- » Xanuun ama hoos u dhaca awooda lagu dhaqdhaqaaqiyo gacanta ama lugta
- » Qaybaha nudaha oo soo dhacaya
- » Laf ama seedo soo muuqda
- » Kabuubyo cusub

### Talooyin dheeraad ah

- Boogaha ka dhig kuwo nadiif ah, qoyan oo daboolan.
- Iska ilaalo in aad aalkolada/hydrogen peroxide u isticmaasho boogaha (kuwani way qalajiyaan).
- Iska ilaalo xoqida boogaha.
- Haddii wax la isku durayo, ku dhaqan xeeladaha yareynta waxyeellada ee hoos ku qoran:
  - » Si hoose ku bilow oo tartiib u soco
  - » Wareeji meelaha wax la iskaga duro
  - » Isku day in aadan wax ku durin meesha ay ku yaalaan booguhu ama u dhow
  - » Isticmaal agab cusub mar kasta oo iska ilaali in aad wax la wadaagto agabka la isticmaalay
- Loogu talagalay agabka yareynta waxyeellada ama si la iskugu xidho qof takhasus u leh wacyigelinta dadka isku faca ah, la xiriir:
  - » La xiriir Health Resources in Action si aad u hesho agabka yareynta waxyeellada si la iskugu xidho qof takhasus u leh wacyigelinta dadka isku faca ah: 1-833-975-0505
  - » Isticmaal meelaha la sii galayo 'links' ee hoosta si aad u hesho adeeg bixiye:
    - ♦ <https://www.oregon.gov/oha/HSD/AMH/Pages/Measure110.aspx>
    - ♦ [Xeerka 110 BHRNS: Hel Adeegyada Daaweynta iyo Ka soo kabashada Lacag la'aanta ah oo Kuu Dhow](#)
    - ♦ <https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/SUBSTANCEUSE/Pages/Harm-Reduction.aspx>
    - ♦ <https://www.treatmentaccessline.org/>
    - ♦ <https://findtreatment.gov/>



**Oregon Health Authority**

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA  
Barnaamijka Ka hortagga Dhaawaca & Rabshada

WAAXDA CAAFIMAADKA HAB-DHAQANKA  
Qaybta Daaweynta Ku tiirsanaanta Mukhaadaraadka iyo Ka hortagga (ATRP)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Barnaamijka Ka hortagga Dhaawaca & Rabshada kala xiriir IVPP. General@odhsoha.oregon.gov ama 971-673-1222 (cod/qoraal). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

200-299810 (01/2024) Somali

Barnaamijka:

<https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/SUBSTANCEUSE/OPIOIDS/Pages/FentanylFacts.aspx>